

SIDEE BAY U SHAQEYNAYSAA?

Barrayaasha waxay isticmaali doonaan qaabkan cusub tiro ah jeebka xannaanada da'da dugsi gaadhay oo kala duwan, oo ay ku jirto xannaano maalmeedka qoyska si loo hubiyo inuu ilmahaagu helo waayo aragnimo tayadeedu sareeyso.

Qaabku wuxuu xoogga saarayaa horumarka iyo fiyoobaanta ilmahaaga. Barrayaasha ayaa kula shaqeyn doona si ay u bartaan ilmahaaga, si ay ugu abuuraan barnaamij dhisaya ilmahaaga awoodiisa iyo wuxuu xiisaynayo. Barrayaasha waxay sidoo kale kugu soo wargelinayaan waxyaalaha ku saabsan dhacdooyinka iyo nashaadyada uu ilmahaagu ka qayb qaato.

Iyadoo la adeegsanayo shanta ujeedo waxbarasho ee Qaabka barrayaashu waxay caawin doonaan ilmahaagu inuu yeesho:

- Dareen xooggan oo ku saabsan aqoonsigooda
- Ku xirnaanta aduunkooda
- Dareen xoog badan oo fiyoobaan ah
- Kalsooni iyo ku lug yeelashada waxbarashadooda
- Xirfado isgaarsiineed oo wax ku ool ah

WADA SHAQEYNTA

Carruurta waa dadaalaan marka qoysaska, barrayaasha, dugsi iyo bulsho weyntuba ay ku wada shaqeeyaan si shirko ah si ay u taageeraan carruurta waxbarashadooda iyo fiyoobaantooda. Shirkadaan guddaaheeda qof kastaa wuxuu qiimeynayaa wuxuu ka geysto midba midka kale waxayna ka qayb galaan go'aan sameyn la wadaago.

Maadaama aad tahay qofka ugu muhiimsan ilmahaaga noloshiisa waxaad sameyn kartaa isbedel adoo si joogta ah ula hadlaya baraha xannaanada da'da dugsi gaadhay ee ilmahaaga. Macluumaadka aad siiso wuxuu u ogolaanayaa barrayaasha inay xiriiriyaan waayo aragnimada guriga, dugsi iyo bulshada dhexdeeda ee ilmahaaga wakhtiga ay ku qaataan iyadoo wada jira jeebka xannaanada da'da dugsi gaadhay. Tani waxay sahlayaa go'aan gaarida wada jirta ee ku saabsan waayo aragnimada xannaanada da'da dugsi gaadhay ee ilmahaaga.

WAXAY CARRUURTU KA YIRAAHDEEN WAX KU SAABSAN FIKRADAHA MUHIIMKA AH EE XANNAANADA DA'DA DUGSIGA GAADHAY

"Waxaan dhab ahaantii dareemayaa inaan halkan leeyahay sababtoo ah waxaa jira wakhti saaxiibadu ay leeyihiin, shaqaaluhu wuxuu dhab ahaantii xushmaynayaa adiga waxaana wax badan oo la qabanayo." **Annabel, 9 jir**



HEL MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Buuggan yar waa horudhaca Wakhtigeysga, Goobtayda, Qaabka Xannaanada Da'ada Dugsi gaadhay ee Australia. Si aad u hesho wax dheeraad ah gal www.deewr.gov.au/earlychildhood ama weydii baraha xannaanada da'da dugsi gaadhay ee ilmahaaga

Waxaa soo saarey Dawlada Australia Wasaaradda Waxbarashada, Shaqada iyo Xiriirka Goobta shaqada ee Golaha Dawlad Goboleedyada Australiya.

SOMALI

Wakhtigeysga, Goobtayada

Qaabka xannaanada Da'da Dugsi gaadhay ee Australiya gudaheeda

My Time, Our Place
Framework for School Age Care in Australia



Macluumaadka qoysaska

Qaabka cusub ee qaranka ee loogu talagalay xannaanada carruurta da'da dugsi gaadhay

MUXUU KU SAABSAN YAHAY QAABKAN CUSUBI?

Qaabku wuxuu qasdayaa inuu u fidiyo oo xoojiyo fiyoobaanta carruurta iyo horumarka jawiga xannaanada da'da dugsiga. Waxay aqoonsatay in carruurta u baahan tahay meel ay ku sameeyaan cayaaro kala duwan iyo waayo aragnimada wakhtiga firaqada ah ee u ogolaanaya inay dareemaan farxad, ammaan iyo debecsanaan. Waxay sidoo kale aqoonsaneysaa inay u baahan yihiin wakhtiga ay ku dhexgalayaan saaxiibada, ku celcelinayaan xirfad bulshadeedka, xalinayaan dhibaatooyinka, iskudayayaan nashaad cusub iyo inay bartaan xirfadaha nolosha.

Waxbarashada carruurta ee jawiga xannaanada da'da dugsiga waxay dhammeystireysaa waxbarashadooda guriga iyo dugsigaba. Jawiga xannaanada da'da dugsiga waxaa jira muhimad weyn oo la saaro reeraha iyo kobcinta xiisaha iyo awooda carruurta



CIYAARTA IYO WAKHTIGA FIRAAQADU WAA FAN

Waayaragnimada ciyaarta iyo wakhtiga madadaalada ay doortaan carruurta oo ay taageeraan barrayaasha wargashan oo kor u qaadaya fiyoobaanta iyo waxbarashada carruurta. Carruurta farxadooda, si wanaagsan wax u arkida iyo dareenka fiican wuxuu muhiim u yahay fiyoobaantooda maskaxeed iyo jajabnaantooda. Jawiga xannaanada da'da dugsiga marka lagu jiro, carruurta waxay si firfircoon ugu lug leeyihiin doorashada inta nashaad ah oo korin doonta xirfadooda iyo aragtidooda waxbarasho nololeedka dheer. Carruurta waxay sahamin doonaan xiisaha guud waxayna sameysan doonaan saaxiibtinimo ka qayb ahaan lahaanshaha da'da xannaanada bulshada dugsiga.

Wakhtiga ciyaarta iyo firaqada ah aad buu muhiim u yahay carruurta. Inkastoo iyagoo adeegsanaya ciyaarta iyo nashaadka wakhtiga firaqada ah waxay:

- Sameystaan xiriirada ay kuwa kale la leeyihiin
- Caddeeyaan shakhsi ahaantooda iyo nafsadooda kali ahaaneed
- Sameystaan wax ogaalkooda, hal abuurkooda iyo xirfadooda dhibaato halinta
- Isla xiriiriyaan inta u dhaxeysa khibradooda hore and waxbarashada dheer ee nolosha
- Saymeystaan dareen fiyoobi.

WAKHTI IYO GOOBTA

Waxaan sameynay qaabka si loo hubiyo in ilmahaagu helo barnaamijyo tayo leh ee jawiga xannaanada da'a dugsiiyeed. Kani waa wakhti muhiim ah iyo meel ay ku nastaan, saaxiibo ka sameystaan, ay helaan koror shakhsiiyeed oo ay sameystaan xirfado iyo qaabab nololeed caafimaad qaba. Iyadoo ay isticmaalayaan barrayaashu qaabkan (xannaaneeyayaasha ilmahaaga) wuxuu siin doonaa degaan leh goobo soo dhaweynaya carruurta iyo qoysaska. Waxay abuur doonaan meelo firfircoon oo jajaban oo ka jawaabaya dhammaan samafalka iyo awoodaha carruurta. Aragtida Qaabkan waxaa loogu talagalay dhammaan carruurta inay dareemaan ammaan oo ay qaataan khibrado ay ku raaxeystaan. Waxay hogaanmin doontaa barrayaasha inay bixiyaan waayo aragnimo ku salaysan ciyaar iyo wakhti firaqo ahba oo hawlgalineysa dhiseysana aasaaska waxbarashada nolosha dheer.



Wakhtigeysa, goobtayda waxay xooga saartaa u arkida carruurta sidii ka qayb qaatayaal firfircoon iyo go'aan gaadhayaal. Carruurta ku jirta barnaamijyada xannaanada da'da dugsiga waxaa la siiyey doorashada iyo masuuliyada, iyo tan waxay bartaan inay sameeyaan xiriirada u dhaxeeya falalka iyo waxa ka dhashada. Qaabka wuxuu aqoonsanayaa wakhtiga iyo goobta iyo sidii carruurta inay la shaqeeyaan barrayaasha si ay u habeeyaan nashaadka iyo waayo aragnimada ee iyaga micnaha u sameynaysa. Barrayaasha iyo carruurta inay isxushmeeyaan oo uu midba midkale ku kalsoonaada, iyo inay wadaagaan go'aan sameynta ku saabsan fursadaha si loo taageero baahida iyo waxay xiisaynayaan.